Buugga Hagidda

ee Dastuurka Ku-meel Gaarka Soomaaliyeed

23 July 2012

Buugga Hagidda waxaa loogu talagalay Shacabka Soomaaliyeed si ay u ogaadaan waxa uu ka kooban yahay qoraalka Dastuurka ku meelgaarka ah.

TUSMO

Sida loo Akhriyo Dastuurka ku Meelgaarka ah **6**

Waa maxay Dastuurku? 6

Sida Loo akhriyo Dastuurka 6

Diinta Islaamka iyo Shareecada **8**

Maxaa looga Baahanyahay Dastuurka 8

Waa maxay heerka uu Dastuurka ku meelgaarka ahi ka joogo Quraanka Kariimka ah iyo Shareecadda Islaamka? 8

Muwaadinnimo **9**

Maxuu qoraalka Dastuurka ku meelgaarka ka leeyahay cidda ah Soomaali? 9

Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka **10**

Ahmiyad ma leedahay caddeynta xuquuqdda asaasiga ah iyo xorriyaddu? 10

Xuquuqda Assaasiga ah ee Dastuurka ku meelgaarka maka turjamayaa baahida dhabta ah ee dadweynaha Soomaaliyeed? 10

Waa maxay waajibaadka Assaasiga ah ee Muwaadinka Soomaaliyeed? 11

Sideebaa loo illaalin karaa xuquuqdda aassaasigas ah, iyo sideebaa loo fulin karaa waajibaadka loo xil saaray? 11

Federaaliyadda iyo Xukunka baahsan **12**

Waa maxayfederaalku? 12

Maxay Soomaaliya u qaadatay nidaamka federaalka hadaan nahay dad mideysan? 13

Sideebaa loo abuurayaa xubnaha dawlada fedraalka? 14

Nidaamka federaalka miyuu wiiqayaa midnimada qaranka mana horseedayaa go'itaan? 14

Miyey Soomaaliya awoodi kartaa inay yeelato tiro dawlad goboleedyo ah, hal dawlad wax ka badan? 15

Ayaa leh awooda iyokantroola dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee Federaaliyadda Soomaaliya? 15

Dawladaha Hoose iyo Baahinta Xukunka 16

Baarlamaanka Federaalka ah **17**

Waa maxay Baarlamanka Cusub ee Federaalku? 17

Maxay tahay hawlaha ka dhexeeya labada aqal ee Baarlamanka Federaalka? 17

Waa maxay masuuliyadaha Gaarka ah ee aqalka dadwynaha ee baarlamanka federaalka? 18

Maxay noqonayaan masuuliyadaha gaarka ah ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka? 18

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya **19**

Waa maxay doorka Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya? 19

Sideebaa loo dooranayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya? 19

Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada **20**

Waa maxay doorka Ra'iisal Wasaaruhu iyo Golaha Wasiiradu? 20

Ayaa magacaaba Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiiradda? 20

Garsoorka **21**

Waa maxay doorka Shareecada Islaamkia ee Nidaamka Garsoorka? 21

Sidee u shaqeynayaa Garooska? 21

Sideebuu ahaanayaa qaab-dhismeedkas maxkamada qaranku? 21

Maxaa looga baahanyahay Maxkamad Dastuur ah? 22

Maxay noqoneysaa masuuliyadaha Maxakamada Dastuuriga? 22

Guddiyadda Madaxabannaan **23**

Waa maxay Guddiyadda Madaxabannaani? 23

Waa kuwee Gudiyadda Madaxbanaan ee sameyntoodu Dastuurka ku meelgaarka ku talinaya? 23

Shaqaalaha Rayidka **25**

Ayaa maamulaya shaqaalaha Rayidka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed? 25

Ayaa magacaabaya saraakiisha sare ee shaqaalaha rayidka? 25

Maaliyada Dawlada 26

Ayaa maamula Maaliyada Dawlada ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaalia? 26

Nabada iyo Amaanka 27

Ayaa damaanad qaadaya nabada iyo ammaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya? 27

Wax ka beddelka Dastuurka 28

Dastuurkan wax ma laga bedeli karaa? 28

Sideebaa Dastuurka ku meelgaarka wax looga bedeli karaa? 28

Sideebaa dastuurka rasmiga ah wax looga bedeli karaa? 28

Saameynta Dastuurka Ku Meelgaarka ah 30

Goormuu dastuurka ku meelgaarka ahi hirgelayaa? 30

Waa maxay saameynta uu yeelan karo dastuurka ku meelgaarka ahi? 30

Sida loo Akhriyo Dastuurka ku Meelgaarka ah

Waa maxay Dastuurku?

Dastuurku waa xirmo ka kooban mabaad'iida asaasiga ah ama wax hore loo ay ugu dhaqmeyn oo ah sida dawladda iyo hayadaheeda ugu shaqeynayaan. Xeerka qabaa'ilka Soomaalidda tusaale ahaan wuxuu xambarsan yahay hawla dastuur, inkastoo aanu jirin qoraalkiisu, ee uu ku e'gyahay in afka la iskaga gudbiyo qarni ilaa ka qarni. Iyadoo xataa maanta wadanadda qaar ay ka mid yihiin wadanka Ingriiska aanu lahayn dastuur qoran. Dastuuradda casriga ee maanta waxay mararka qaar ay ka kooban yihiin oo keli ah hal dhakumenti kaasoo qeexaya mabaad'iida iyo hab-dhismeedka ay dawladda hayadaheeda ku shaqeeyaan una shaqeyso.

Xorriyaddii 1960gii ka dib Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay qaadatay dastuur qoran oo lagu ansixiyey Afti qaran. Waxa dastuurkaas lagu bedelay dastuurkii 1979 kii, kaasoo isna lagu aqbalay Afti qaran. Axdiga Qaranka ee ku Meelgaarka ka dib burburkii hab-dawladeedka ee dalka ka jiray sannadkii 1990gii, Axdiga Qaranka Ku Meelgaarka ah ayaa la qaatay sannadkii 2000kii kaasoo ahaa talaabadii ugu horeysay ee dib loogu sameynayo nidaam dawali ah oo ku saleysan dastuur.

Axdiga Qaranka ee ku Meelgaarka ahi waxaypro mudadiisu dhamaatay sannadkii 2003gii waxana lagu bedelay Axdiga Qaranka ee Dowlada Federaalka sannakii 2004kii. Maanta isaga ayaa ah dastuurka ku meel gaarka ah, kaasoo lagu xukumo Dawladda Federaalka ee Ku Meelgaarka ah iyo hayadaheeda. Gudiga Ansaxinta Dastuurka ayaa imika awood loo siiyey inay si ku meelgaar ah u ansixiyaan dastuurka cusub oo bedela Axdiga Qaranka Federaalka. Dastuurkani wuxuu markaas noqon doona dastuur Soomaaliyeed oo rasmi ah ilaa iyo inta loo qaadayo Afti qaran.

Sida Loo akhriyo Dastuurka

Dastuurku waa dhakumenti sharci ah, kaasoo ay tahay mararka qaar inay adagtahay akhrigiisu iyo fahamkiisu hadii aanu qofku lahayn aqoonta sharciyadda ama aanu u qaadan tababar. Sababtu waxay tahay in luqada lagu isticmaalo ay tahay hab gaar ah iyo weedhah gaar ah. Waxay taasi keentaa In habka iyo taxanidda weedhahu u qoranyhiin aan si ula kac ah loo bedelin sabtoo ah inay taasi saameyn ku yeelan karto macnaha siiqada qoraalka.

Dastuurku uma baahaana keli ah inuu ahaado hab taxan oo cilimiyeysan marka laga eegayo siiqada qoraalka weedhaha iyo kelmaddaha la isticmaalyo, waase inuuu ka koobnaadaa macne la fahmi karo oo maangal ah. Arrimahani waa muhiim, waana in aad loo tixgeliyo marka la sameynayo dib u-eegista nuqulka qabyo qoraalka. Iyadoo arrintan laga tilmaam qaadanayo, dastuurku waa in loo tixgeliyaa dhakumenti dhameystiran oo sharciyeysan. Weedhahu keli ahaan iskuma taagi karaan, balse waa in lagu isticmaalo laguna dabaqaa dhakumentiga oo dhan.

Mararka qaar, waxa dhacda in ka dib marka la isla akhriyo dhowr qodob, in la ogaan karo macaha habeysan ama nidaam la fahmi karo lana jeceleysan karo ujeedada dastuurku ka hadlayo. Hadaba gebi ahaan qodobada dastuurku waa inay mar waliba loo akhriyo loona fasiro si wadajir ah ee aan si goni goni ah loo fasiran.

Diinta Islaamka iyo Shareecada

Maxaa looga Baahanyahay Dastuurka

Su'aasha ah in dal muslim ahi yeeshodastuur qoran, waxaa si gaar ah uga manaaqashooday Culumaa A'diin kala duwan ilaa iyo qarnkii ugu dambeeyey. Ulmaa A'diinka waxay sheegeen in 'Sahifa' ahaa dastuur qoran midkii ugu horeeyey ee tixraac laga soo qaatay. Dhakumentigan wuxuu ka marag bixinayaa in Ra'suulku (NNGH) aqoonsaday in bulshada iyo siyaasadda ay isku-xiritaankoodu u baahaahan yahay dastuur, waxaanu khibradiisa siyaasadeed ku isticmaalay in dastuurku isku xiro dadka reer Madiina ee kala qaybsan. Waxa Sahifa, Rasuulku (NNGH) ku tilmaamay inuu yahay hab dawli ah oo islaam ah kaasoo ay ku wada noolyihiin dad isku mid ah dhinac kasta marka laga eego, isla markaasna nidaaminaya arrimhadooda bulsho iyagoo isticmaalyo dastuur habeynaya maamulka cadaaladeed.

Axa intaas raaca, in aqoonyahaniinta Diinta Islaamka fiiro u yeesheen in ilaa iyo mudadaas ay arrimuhu ka duwan yihiin kuwii waqtigaas ka jiray Madina. Duruufaha u gaarka ah dal kasta oo Muslim ah wuxuu ku kala duwan yahay dhinaca baaxadda tirada dadkooda iyo heerka horumarineyd iyo baahidooda. Hase yeeshee, Sahifa waxay ku shaqeysaa dhidibka asaasiga ah maanta ka jira xaaladdaha adage ee dalalka Muslimka ah. Isla markaas, inta badan dalalka Muslimka ah waxay leeyihiin dastuuro waqtigaan haadirka ah.

Waa maxay heerka uu Dastuurka ku meelgaarka ahi ka joogo Quraanka Kariimka ah iyo Shareecadda Islaamka?

Dastuurka ku meel gaarka ahi waxaa saldhig u ah Quraanka Kariimka ah iyo Sunnaha Rasuulka. Wuxuu hirgeliyaa maqaadiista Shareecada iyo cadaalada Bulshada - fiiri qodobka 3 (1) waxa ku cad arrin gaar ah taasoo caddeyneysa in baarlamaanku aanu sharci ka horimanaya mabaad'iida Shareecada Islaamka sina u ansixi Karin – fiiri qodobka 2 (3). Waxa awooda leh maxkamadaha inay jebiyaan sharci kasta oo ka soo horejeeda Shareecada Islaamka; waxaana loo aqoonsan yahay in uu Dastuurkana ka soo horjeedo – fiiri qodobka 109C (1) (a) iyo (b). Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka waxuu xaqiijinayaa diinta Islaamka inay tahaydiinta dawliga ah ee dalka Soomaaliya – fiiri qodobka 2 (1). Sida Shareecaddu fareyso, dastuurka wuxuu si adag u qeexayaa diidmada in Diimo (religions) kale oo aan ahayn diinta Islaamka laga faafiyo dalka Soomaaliya-fiiri qodobka 2 (3).

Muwaadinnimo

Maxuu qoraalka Dastuurka ku meelgaarka ka leeyahay cidda ah Soomaali?

Dastuurka ku meelgaarka Soomaaliyeed wuxuu sheegayaa inuu jira hal muwaadinnimo oo Soomaaliyeed – fiiri qodobka 8aad. Qofka Soomaaliga ah lagama qaadi karo muwadinimadiisa xataa markuu noqodo muwaadin dal kale – fiiri qodobka 8aad (3). Aqalka Dadweynaha ee baarlamanka federaalka ayaa qexxidoono sida loo heli karo muwaadinimo Soomaliyeed, sida looga qaadi karo ama loo laali karo–fiiri qodobka 8aad (2).

Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka

Ahmiyad ma leedahay caddeynta xuquuqdda asaasiga ah iyo xorriyaddu?

Xuquuqda assaasiga ah ee ku sheegan Dastuurka ku meelgaarka wuxuu waajib ku yahay hayadaha dawlada marka ay ku dhaqmayaan shuruucda dalka, waana inay xaq-dhawraan/ilaaliyaan dhamaan hayadaha dawliga ah, saraakiisha xukuumadda, hay'adda madax-banaan iyo shakhsiyaadkuba – fiiri qodobka 12aad (1). Xukuumada waxa waajib ku ah inay ilaaliso xuquuqda assaasiga ah iyo xorriyada qof kasta mar waliba- fiiri qodobka 12aad (2). Jiritaanka iyo qiimaha xuquuda aassiga ah iyo xorriyada waxay hadaba dastuuriyan/sharciyan damaanad qaadeysaaa, waxayna yeelaneysaa ahmiyad, waayo waxay abuureysaa assaaska dhabta ah ee Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya.

Xuquuqda Assaasiga ah ee Dastuurka ku meelgaarka maka turjamayaa baahida dhabta ah ee dadweynaha Soomaaliyeed?

Maadaama ay adagtahay in lagu raaxeysto xuquuqda, haddii qofku ku noolyahay fakhri ama buukaan, isla markaasna aanu awood u heli Karin xanaano caafimaad, Dastuurka ku meelgaarka wuxuu siinayaa ee xuquuq taxan ay ka mid yihiin dhinaca dhaqaalaha iyo xuquuqda bulshadaba, sida xaq u yeelashada biyo nadiif ah, xaq u yeelashada dhaqaale caafimaad, iyo xaq u yeelashada ammaan dhan oo bulsho–fiiri qodobka 27aad.

Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka, wuxuu caddeynayaa in qoysku yahay saldhiga bulshada soomaaliyeed, inuu ilaaliyo hooyanimadda iyo caruurnimadda, wuxuu aqoonsan yahay xaq u yeelashada carruurta in la dhaqaaleeyo – fiiri qodobka 28aad iyo qodoba 29aad. Arrinta kale ee ahmiyadda leh ee la xiriirta bulshada soomaaliyeed waxay tahay, in si gaar ah fiiro loogu yeesho bulshada soomaaliyeed dhaqanka iyo caadooyinka ay ku dhaqmaan, taaso ah masuuliyada gaar ah oo saran Xukuumad Soomaaliyeed inay horumariso haddii ay saameyn fiican ku leeyihiin bulshada, iyo inay baabi'yaan haddii ay saameyn xun ku leedahay bulshada Soomaaliyeed – fiiri qodobka 31aad (1). Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu dhigayaa in la illaaliyo hiddaha iyo dhaqanka soomaaliyeed iyo afka (dialect) u gaarka ah Dadka laga tirada badanyahay – fiiri qodobka 31aad (1). Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu xaaraantinmaynayaa quursiga ku saleysan luqada, wuxuu illaaliyaa luqooyinka dadka laga tiro badan yahay ee ka jira dalka Soomaaliiyeed. Xuquuqda loo simanyahay waxay iyana diidantahay nooc kasta ooquursi

ah; kuwaasoo ku saleysan qabiil, dhalasho, ama afafka lagu hadlo – fiiri qodobka 11aad (1).

Ujeedada qoraalka Dastuurka ku meelgaarka waadib-u-dhiska Soomaaliyeed oo ku saleysan nabad, barwaaqo, degannaansho iyo dal dhaqan leh.

Waa maxay waajibaadka Assaasiga ah ee Muwaadinka Soomaaliyeed?

Iyadoo sida xaqiiqada ah la aqoonsanyahay in xuquuqda Islaamku lagu dheelitiro wajibka shakhsiga, qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu sheegayaa kuna caddeynayaa oraaho ku saabsan waajibaadka muwaadinniinta Soomaaliyeed. Waxa ka mid ah: baahida loo qabo inuu noqodo wadani u daacad ah Dalkiisa Soomaaliya, inuu horumariyo jiritaanka wacan ee dalka, inuu ka qayb qaato hawlaha guudee danta u ah muwaadinga Soomaaliyeed, qoyska iyowaanaga bulshada, ka qeeb qaato horumarinta qaranka, horumarinta mas'uuliyadda waalidnimadda, inuu adkeeyo midnimadda qaranka isagoo dhaqan wanaag kula socda dadka kale, inuu horumariyo la-xisaabtanka iyo ku dhaqanka sharciga, inuu xog-ogaal u ahaado mabaad'iida dastuurka, inuu ayidoisla markaasna difaacodastuurka iyo sharciga iyo inuu ka qayb qaato kharaj-bixinta dadweynaha inta uu awood inuu bixiyo/bixiso – fiiri qodobka 42aad.

Sideebaa loo illaalin karaa xuquuqdda aassaasigas ah, iyo sideebaa loo fulin karaa waajibaadka loo xil saaray?

Ilaalinta xuquuqda aassaasiga ah iyo fulinta waajibaaka waxaa ilaalinaya maxkamadaha, kuwaasoo leh awooda ay ku daba geli karaan saraakiisha dawladda iyo muwaadaniinta u xilsaaran inay fuliyaan iyagoo ku dhaqmaya sida uu qorayo dastuurka ku meelgaarka–fiiri qodobka 39 (1) ee dastuurka ku meelgaarka ah. Xukuumaddu waxa ku waajib ah Inay sameyso helitaanka maxkamado ay dadweynuhu si fudud u gaari karaan – fiiri qodobka 39 (2) ee dastuurka ku meelgaarka marka ay ka fasiraayo xuquuqda aassaasiga, inay qaadaan qaab ay ku raadinayaan in ay ku gaaraan ujeedada xuquuqaha iyo qiyamkooda–fiiri qodobka 40 (1). Waxa intaas raaca, marka la fasiraayo iyo marka lagu dhaqmayo sharciga guud ahaan, maxakamaduhu waa inay hubsadaan in go'aannadooda waafaqsanaadaan xuquuqda aassaasiga inta ugu badan ee suragal ah-fiiri qodobka 40 (3).

Federaaliyadda iyo Xukunka baahsan

Waa maxayfederaalku?

Federaaliyaddu waa hab siyaasi oo ku saleysan in awood-dawladeed baahsanaato, taasoo la qaybsanayo awooda xukunka (ee dawladda dhexe iyo is-xukun (dowladaha goboladda). Marka loo eego hababka siyaasadeed ee awood baahinta, waxayna iyadu ku saleysan in la wadaago xukunka iyo is-xukunka waana mid damaanadeysan taasoo uu dastuurku ku ilaalinayo nidaamka federaalka mana ka laaban karaan dowladda dhexe iyagoo aan dib u-eegis lagu bedelayo dastuurka aan la sameyn, taasoo u baahan la-tashiga dowladdaha goboladda.

Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka ah wuxuu tilmaamayaa arrimahan soo socda ee astaamaha u ah nidaamka federaalka:

1. Waa inay jiraan laba heer oo dawladeed (heer dowladda federaalka iyo heer Dawladaha xubinnaha ka mid ah Dawladda federaalka oo ay ku jiraan dawladaha hoose iyo xubno dawlado ka mid ah dawlada federaalka) iyo in labada heer ee ay doorteen muwaadaniinta oo ay la xisaabtamaiyan-fiiri qodobka 48aad iyo qodobka 50aad.

2. Guud ahaan awooda xukuumadu, iyo masuuliyadeeda dawladnimo waa inay u qaybsantaa dawlada federaalka iyo dowladaha xubinaha ka ah dawladda federaalka, marka la abuuro. Awood –qaybsashada gaarka ah iyo masuuliyaduhu waa inay noqdaan qaar lagu sii heshiin karo marka laga hadlayo arrimaha oo dhan; laga reebo kuwa la xiriira arrimaha dibedda, difaaca qaranka, muwaadinnimadda, socdaalka iyo shuurudaha maaliyadda, kuwaasoo noqon kara qayb ka mid xawilaad dawladda federaalka-fiiri qobodka 54aad.

3. Xubnaha dawladaha federaalka waa inay goobjoog ahaadaan marka go'aan gaarista heerka federaalka la sameynayo, go'aankaasoo la marinayo Aqalka Sare ee baarlamanka federaalka oo ka kooban wakiilo laga soo doortay dadweynaha ee xubin kasta oo ka mid ah dowlada federaalka ay matalaan- fiiri qodobka 61aad (3).

4. Nidaamka federaalka iyo awood-qaybsashada iyo mas'uuliyahada ka dhexeeya dowladda federaalka iyo dawladaha xubnaha ka mid ah

dawladda federaalka waxa loo ilaaliyaa si dastuurka waafaqsan. Nidaamka si gooni ahaan ah loogama noqon karo sababtoo ah in wax ka- bedelka dastuurka u baahan yahay ku-heshiin laga helo labada Aqal ee Baarlamanka Federaalka. Arrintani waxay markaas u baahantahay la-tashiga xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaneka Federaalka, kaasoo ka wakiil ah xubnaha dawladaha federaalka – fiiri qodolbka 132aad ilaa 134aad.

5. Waa inuu jiraa nidaam dhedhexaadin ah kaasoo lagu xallilinayo khilaafaadka ka dhexeeya dawlada federaalka iyo xubnaha dawladaha federaalka. Nidaamkani wuxa ka koobnaanayaa gudi ka dhexeysa dowladaha–fiiri qodobka 111(f) iyo maxkamada dastuuriga taasoo ah dhexdhexaadinta ugu dambeysa ee goaanada iyo xallilinta khilaafyada–fiiri qodobka 109 (1) (d).

Maxay Soomaaliya u qaadatay nidaamka federaalka hadaan nahay dad mideysan?

Maadaama sanadda badan ay jirtay nidaam ku dhisan dawlad dhexe iyo kontrool, dad deggan qaybo badan oo ka mid ah dalka soomaliya ayaa dalbaday inay gobol ahaan isku xukumaan. Sannadihii khilaafyadda dhexdooda, goboladda qaar ka mid ah ayaa bulshadoodu waxay sugeen xasilooni waxayna aaminsanyihiin inay muujiyeen karti ay ku maamulaan arrimahooda heer goboleed iyagoo isla markaa daacad iyo masuuliyadaha muwaadinnimada Soomaaliyeed aan ka tegin.

Si damaanad qaad loo siiyo gobolada is-xukuma, dastuurka waa inuu u ogolaadaa isla markaan nabadgeliyaa. Dastuurku waxuu damaanad qaadayaa hababka runta ah ee nidaamka federaalka. Waxa kaloo ka jira gobolo badan ee Soomaaliya, hab-dhismeed dawladeed oo wax ku ool ah; kuwaasoo la abuuray iyadoo xataa ayna jirin nidaam dhexe oo dawladeed. Dawlad goboleedyadaasi waxay u keeneen shacabkooda khidmaddo dowladeed. Waxa aad u fiican in lagu kabo hab-dhismeedka dowlad goboleedyadda maamul iyo nidaam siyaasi oo dalku yeesho, markaana dib u-dejib lagu sameeyo awooda xukuumada lagana dhigo dowlad dhex oo la kala saaro. Markaa ka dib nidaamka federaalka wuxuu meeleynayaa dowlad goboladda jira, kuwaasoo ay ka mid tahay Puntland ama Galmudug.

Sideebaa loo abuurayaa xubnaha dawlada fedraalka?

Abuurista xubnaha dawlada federaalka waxay noqotay arrin aad u qalafsan markii lagu jiray shirarka dastuurka ee lagu gaarayey dastuurkan ku meelgaarka. Waxa la ogaaday inay tahay muhiim, in la yeesho hab xaq ah oo nidam furan ah si loo abuuro xubnaha ka tirsan dawladda federaalka, laakiin waxa loo xilsaary Aqalka Dadka ee baarlamaanka federaalka kaasoo matala dadka Soomaaliya oo dhan, inay go'aamiyaan tirada iyo xadayaan xubnaha dowaldda federaalka-fiiri qododka 49aad.

Go'aanka Aqalka Dadka ee baarlamanka federaalka waa inuu ku dhisnaadaa tallooyinka xuduudaha ee gudiga federaaliyada, kaasoo ah gudi madaxbanaan oo ka kooban dad khibrad leh oo matalaya qaybaha Soomaaliya oo dhan. Gudigani waa inuu daraasad ku sameeyaa dalka, la hadlaa muwaadinniinta Soomaaliyeed iyo khabiirada, isla markaasna qorsheeyaa tirada and xariijimaha wax ku oolka ah ee xubnaha dawlada federaalka –fiiri qodobka 49aad (2) iyo qodobka 111aad. Hadaba Si waafaqsan qoraalka Dastuurka ku meelgaarka waxaa jiridoono waqti badan oo dadweynuhu kaga doodi karo arintan.

Nidaamka federaalka miyuu wiiqayaa midnimada qaranka mana horseedayaa go'itaan?

Waxa jiri karaa mushaakil ku saabsan federaaliyadda, laakiin kama badna tan nidaamka xukuumad keliga ah (unitary states). Dalalka ugu qanisan ee ugu xasiloon adduunka waa kuwa federaaliyadda ah – sida Maraykanka, Jarmalka, Switzerland, Austria, Australia – mana jiro wax muujinaya inay midnimo iyo wadaninimo ka maqantahay dalalkaas. Daraasad is-barbardhig ah oo lagu sameeyey arrintaas, waxa caddaatay in hadidaadda gobol-goosigu kaga badan tahay nidaamka xukunka keli dhexaadka ah marka loo eego nidaamka federaalka. Waxa masaal lagu soo qaadan karaa Somaliland taasoo isku deydey inay ka go'do Jamhuuriyada Soomaaliya markay ahayd xukuumad keli ah oo dhexaad ah. Hor-istaaga goosashada iyo horumarinta midnimada waxa damaanad qaadi kara jiritaanka dowlad faa'iido dhab ah u keeni karta dadkeeda oo dhan taasoo dadkoo dhana ay rabaa inay ka mid noqdaan.

Arrintani waxay ku qeexan tahay qoraalka dastuurka ku meelgaarka ah sababtoo ah inay shacabka goboladda Soomaaliyeed yeelan dooonaan u madax-banaanaanta xukunka arrimahooda ilaa iyo darajo wax ku ool ah, waxayna yeelan kartaa fursada ka qayb-qaadashada go'aan gaarka ku

dhisan dimoqraadiyada ee heerka federaalka. Arrintani waxay dhimi kartaa u hanqaltaaga goosashada iyo madaxbanaanida ee ma abuuri doonto. Si loo xasiliyo xiriir iyo iskaashi la isku af-garto oo ka dhexeeya dawladaha kala duwan ee heerka federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah fedeeraalka, Dastuurka ku meelgaarka wuxuu si gaar ah u soo saaray qodobo dalbaya shirar joogto ah oo ay iskugu yimaadaan madaxda sare iyo saraakiiska dawlada, war kala-hel isfaham iyo isku xirnaan iyo iskaashi adag oo ka dhexeeya dawladaha kala duwan–fiiri qodobka 51aad iyo qodobka 52aad ee Dastuurka ku meelkaarka ah.

Miyey Soomaaliya awoodi kartaa inay yeelato tiro dawlad goboleedyo ah, hal dawlad wax ka badan?

Nidaam siyaasi quwad leh, si wacana u shaqeynaya waa assaska wax soo – saarka dhaqaale iyo barwaaqo maal ay ku dhisantahay. Soomaaliya waayo arragnimadeedu waxay tilmaameysaa sida ay ummadi dhaqaale balaaran uga khasaari karo hadii ay ku guul dareysato dhinaca siyaasada. Hadaba waxa ka sii khasaare badnaan kara marka laga eegayo mudadda dheer ee mustabalka (long term), hadii nidimka keli-xukumaad dhexe uu ku guuldareysto inuu habeeyo baahida gaarka ah ee dadka goboladda Soomaaliyeed. Xataa iyadoo ay qaybinta kheyraadka iyo awooda cashuur kordhinta ay weli ku xujeysantahay heshiis la isla galo iyo baahida oo la qeexo, dastuurka ku meel gaarka ahi si uu habeeyo nidaam siyaasadeed oo wax ku ool ah iyo nidaam lacageed oo ka jira federaaliyadda, waxay u baahantahay inay dawladu hawl-qabadkeedu firfircoonaado iyo cashuuraha la kordhinayo ee heerka dawlada meelaha ay si hirgal ah u shaqeyneyso ama cashuuraha la kordhiyey – fiiri qodobka 50 (b) iyo (f).

Ayaa leh awooda iyokantroola dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee Federaaliyadda Soomaaliya?

Nidaamka federaalka oo loo ku dhafan shuruuc wadaag ah iyo ismaaul gaar ah ayuu qexayaa qodobada Dastuurka ku meelgaarka ah ee ku saabsan dhulka iyo kheyraadka dabiiciga iyo sida loo isticmaalayo inay ku xujeysantahay heshiis dhexmara dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka – fiiri qodobka 44aad ee dastuurka. Marka laga hadlyo dhulka, dastuurku wuxuu u golyahay dawlada federaalka inay sameyso shurruddaha qaranka ee dhulka kaasoo ku dhisan u sinaanshaha dhul-siinta iyo isticmaalka kheyraadkeeda oo ah heer qaran, lakiin waa in isla markaas la siiyo madaxbanaani xubnaha dawlada federaalka inay sharciyeyso shuruudaha dhulka ee goboladooda- fiiri

qodobka 43aad ee dastuurka ku meel gaarka ah. Illaalinta deggaanka waa ahmiyada kowaad ee mas'uuliyada dawlada federaalka, laakiin dawladaha xubnaha federaalka waxay iyana sidoo kale ay masuul ka yihiin illaalinta deggaanka waxayna dawlada federaalka ahi u baahan tahay inay la tashato dawladaha xubnaha federaalka marka ay qaadanayaan shuruurdaha guud ahaaneed ee deeggaanka dalka–fiiri qodobka 45aad.

Dawladaha Hoose iyo Baahinta Xukunka

Maadaama Qaybyo qoraalka dastuurka ku-meel gaarka ah uu dhisayo labo heer xukuumadeed, wuxuu kale uu tilmaamayaa heer seddaxaad ee xukumadeed loguna magacaabo dawladda hoose. Hadaba, dawladda hoose iyo xubin ka tirsan dawladda federaalka waxaa loo qaadanayaa in ay noqonayaan xubin heer xukuumadeed ee ka tirsan dawladda federaalka-eeg Qodobka 48 (1) (b). Waxaa loo daayay dastuurka dawalaha ka tirsan dawladda federaalka in ay sameyso qawaaniin iyo xubno fulin ee xukuumaddo ka tirsan dawladda federaalka-eeg Qodobka 120. Tani waxaa ku jira qaabeynta iyo dhisidda hayadaha dawladaha hoose. Qabyo qoraalka dastuurka ku-meelgaarka ah wuxuu ka tagay heerka qaabeynta, dhisidda, awoodaha dawladaha hoose hase ahaate, qaab kasto siyaasadeed iyo maamul baahinta isxukunka waxaa hagi doona dastuurada dawladaha federaalka oo ka mid ah dawladda federaalka. Inta laga gaarayo sameynta xubnaha ka tirsan dawladaha federaalka iyo ansixinta dastuurahooda, nidaamyada dawladaha hoose ee hadda jira waxa si toos ah u maamulaya xukuumadda federaalka ah- eeg Qodobka 48 (2).

Baarlamaanka Federaalka ah

Waa maxay Baarlamanka Cusub ee Federaalku?

Sida uu dhigayo dastuurka ku meelgaarka ah, Soomaaliya waxay qaadaneysaa nidaamka federaalka iyo baarlamaan cusub oo federaal ah, oo ka kooban laba aqal: Aqalka Dadka iyo Aqalka Sare–fiiri qodobka 55aad ee dastuurka ku meelgaarka. Xubnaha aqalka dadka wuxuu leeyahay mas'uuliyada matalaada dadka deegaankiis laga soo doortay. Xubnaha Aqalka Sare waxay iyana leeyihiin masuuliyadda gaar ah oo ay ku matalayaan xubnaha dawladaha federaalka ee laga soo doortay si ay u amaan-ilaaliyaan nidaamka federaalka –fiiri qodobka 61aad ee dastuurka ku meelgaarka ah. Hase yeeshee Xubnaha labada aqal waxay mar waliba ilaalinayaan danaha Qaranka Soomaaliyeed dhamaantiisba–fiiri qodobka 61 (1).

Maxay tahay hawlaha ka dhexeeya labada aqal ee Baarlamanka Federaalka?

Ahmiyad kowaad ee masuuliyadda baarlamanka federaalka waxa weeye inuu dalka u sameeyo sharciyo kuwaaso ay ka mid yihiin sharci bedelaada lagu sameeyo dastuurka–fiiri qodobka 69aad iyo qodobka 71aad ee dastuurka ku meelgaarka ah. Marka dalka loo sameynayo sharciyadda, waxa loo baahan yahay in labada aqal ay isla shaqeeyaan, inkastoo aqalka dadweynuhu leeyahay awooda uu ku jabin karo go'aanada aqalka sare hadii la helo aqlabiyad saddexdii meeloodba laba (2/3) ee wadarta codadka xubnaha ku jira baarlamaanka–fiiri qodobka 81aad ilaa 83aad.

Marka bedelaada lagu sameynayo dastuur waxa mar waliba loo baahan yahay la-tashiga Aqalka Sare ee baarlamanka federaalka–fiiri qodobka 132-134. Isla shaqeynta iyo wadaaga go'aan gaarka ka dhexeeya labada aqal ee baarlamanka federaalka wuxuu kaloo loo baahan yahay marka la dooranayo ama la xil-qaadis lagu sameynayo Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya–fiiri qodobka 89aad iyo qodobka 92aad, Ku dhawaaqidda xukunka deg deg ah ee xukuumada fiiri qodobka 131 iyo ku dhawaaqida dagaalka – fiiri qodobka 71aad (f). Si loo fududeeyo wadaaga go'aan gaarista ee labada aqal ee baarlamanka federaalka, wada fariisiga iyo wada -sameynta gudiyadda mar walba way suura geliyi kartaa–fiiri qodobka 57aad, 62aad iyo 81 (3).

Waa maxay masuuliyadaha Gaarka ah ee aqalka dadwynaha ee baarlamanka federaalka?

Sida uu Dastuurka ku meelgaarka u doorbidaynidaam xukumadeed oo baarlamaani ah kaasoo hayadda fulinta ay markasto ku xirantahay taagyeeridda baarlamaanka oo ah, hayadda siyaasadeed ee ugu muhiimsan ee Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya wuxuu noqonayaa baarlamaanka cusub ee federaalka. Hase yeeshe heerka federaalka, Ra'iisal Wasaaruhu iyo Golaha Wasiiradu waxay u baahan yihiin keli ah, kalsoonida aqalka dadka ee baarlamanka federaalka–fiiri qodobka 69aad (2) (e), 90aad (d), 100aad (c). Sidoo kale Aqalka Dadka wuxuu lahaanayaa awoodaha qaarkood Kaamil ah, una baahneyn taageerada Aqalka Sare ee baarlaman federaalka, waxaana ka mid ah ansixinta inta badan ee gudiyada madax bananan-fiiri qodobka 69 aad (2).

Maxay noqonayaan masuuliyadaha gaarka ah ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka?

Mas'uuliyada gaarka ah ee Aqalka Sare waxay tahay matalaada danaha gaarka ah ee dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalk marka la sameynayo habka go'aan gaarista ee baarlamaanka federaalka, taasoo khuseysa dawlada federaalka ama dowladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka. Hadaba wax ka bedelka Dastuurka ku meelgaarka, doorashada iyo xil ka-qaadista madaxweynaha ee Jamhuuriyada Federaalka , ku dhawaaqid dagaalka iyo ku dhawaaqida xaladaha deg deg ee xukuumada, magacaabida xubin ka mid ah Gudiga Waaxda Cadaalada, Xaakinada maxkamada dastuuriga, xubnaha Gudiga madaxbanaan ee Doorashooyinka, xubnaha Gudiga Xuduudaha Fedeeraalka, iyo xubnaha Gudiga xukuumadaha dhexdooda waxay u baahanyihiin ra'yiga aqlabiyada xubnaha Aqalka Sare ee baarlamanka federaalka–fiiri qodobka 71aad.

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya

Waa maxay doorka Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya?

Sida uu dhigayo qoraalka Dastuurka ku meelgaarka, Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka wuxuu ahaanayaa madaxadawladda, astaanta midnimada qaranka iyo illaaliyaha iyo horumariyaha mabaad'iida aassaasiga ee dastuurka – fiiri qodobka 87aad. Madaxnimada ka sokow, waxaa hawlahiisa badan ka mid ah inuu saxiixo nuqulka qoraalka qawaaniinta baarlamaanka federaalku ansixiyey inay qawaaniin rasmi ah noqdaan, furitaanka iyo kala dirista Aqalka ee Baarlamaanka Federaalka, magacaabida sarkaakiisa sare ee dowlada uu ka mid yahay Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada, xaakinada maxkamada dastuuriga, Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida, ku dhawaaqida dagaalka iyo xukunka degdeg ah–fiiri qodobka 90aad.

Sideebaa loo dooranayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya?

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaalia wuxuu ka shaqeynayaa isla markaasna gudanayaa masuuliyadaha la xiriira dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka .Si loo xoojiyo sharciyeynta doorashada madaxweynaha ee labada aqal ee baarlamanka federaalka oo ay si wadajira ah uga fariistaan waa in lagu doortaa aqlibiyad 2/3 - fiiri qodobka 89aad. Ka dib marka laba wareeg oo codeyn ah la sameeyo hadii uu musharaxna heli waayo aqlabiyada loo bahan yahay ee 2/3, waa in la sameeyaa codeyn saddexaad oo loo qaado labada musharax ee ugu tirada badanaa wareega doorashadii labaad. Musharaxa ugu codeynta badnaada iyadoo la raacayo habka aqlabiyada fudud ee doorashadan ayaa loo dooranayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed – fiiri qodobka 89aad (5) (d). Mudada xilka xafiiska ee Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay noqoneysaa afar sano; waxaana madaxwynaha xilka looga qaadi karaa khiyaano qaran ama dambi culus, hadii uu destuurka ama qawaaniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya meel kaga dhaco. Waxa madaxweynaha xilka looga qaadi karaa iyadoo la isticmaalo habka xil ka-qaadista ee rasmiga ah nidaam kaasoo u baahan taageerada maxkamada dastuuriga, taasoo u baahan codeyn aqlabiyadeed (2/3) ee xubnaha labada aqalka ee baarlamanka federaalka- fiiri qodobka 92aad.

Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada

Waa maxay doorka Ra'iisal Wasaaruhu iyo Golaha Wasiiradu?

Maadaama madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya uu yahay madaxa dawladu, inta badan shaqooyinka sare ee xukumaddu waxay dusha ka sarantahay Golaha Wasiirada–fiiri qodobka 97aad. Golaha Wasiiradu waxa guddoomiye ka ah Ra'iisal Wasaaraha, kaasoo ku shaqeyn doona madaxa dawlada federaalka–fiiri qodobka 100aad (a). Xubnaha Golaha Wasiirada waxay mid mid xisaabtamaya Ra'iisal Wasaaraha – fiiri qodobka 100aad (b), qodobka 102 (1). Golaha Wasiiradu waxay wadar ahaan uga amar qaadanayaa Aqaka Dadka ee Baarlamaanka Federaalka ah, kaasoo laga yaabo inay waqti kasta, ay kala diri karaan golaha wasiiradda iyagoo isticmaalaya haba 'kalsooni darrada' (no confidence) fiiri qodobka 69aad (2) (e), 90 (d), 100 (c). Golaha Wasiiradu waxay mas'uul ka noqonayaan dejinta siyaasadda dawlada iyo hirgelintooda, diyaarinta qoraalka qawaaniinta si loo hordhigo Aqalka Dadka ee baarlamaanka federaalka, hirgelinta qawaaniinta dalka, diyaarinta miisaaniyad sannadeedka iyo xil ka-qaadista saraakiisha sare ee dawlada iyo magacaabista, qoritaanka iyo xil ka-qaadista Safiiradda, Qunsuladda iyo diblomaasiinta–fiiri qodobka 99aad.

Ayaa magacaaba Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiiradda?

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ayaa magacaaba Ra'iisal iyo inuu talo ka soojeediyo xubnaha golaha wasiirada–fiiri qodobka 90aad (d). Ka dib marka madxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya magacaabo Raiisal Wasaarahu, waa inuu diyaariyaa magacaabida xubnaha golaha wasiirada iyoqorshaha xukumadda, horna geeyaa aqalkabaarlamaanka ee dawlada federaalka–fiiri qodobka 100aad (c). Hadii Ra'iisal Wasaaruhu ku guuleysan waayo ansixinta Aqalka Dadka ee baarlamaanka federaalka ama lumiyo kalsoonida waqti kale oo dambe, madaxweynuha waxa waajib ku ah inuu xilka ka qaado Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiiradaba isla markaas uu magacaabo Raiisal Wasaare cusub–fiiri qodobka 69aad (2) (c), qodobka 90aad (d) qodobka 100aad (c).

Garsoorka

Waa maxay doorka Shareecada Islaamkia ee Nidaamka Garsoorka?

Shareecadda waa lafdhabarka nidaamka garsoorka sida ku xusan Dastuurka ku meelgaarka. Makaduhu waxay ku dhaqmayaan sharciyo waafaqsan shareecada, waxayna ka horimaanayaan sharci kasto oo ka soo horjeedo shareecada Islaamka–eeg Qodobka 4, 109 (2).

Sidee u shaqeynayaa Garooska?

Garsoorka wuu ka madaxbannan yahay qeybaha kale ee xukumadda. Xubnaheeda waxa laga ilaaliyaa in lagu qaado fal dambiyo la xiriia ka shaqeynta hawlahagarsoorka, waxaanay ku hogaan samayaan oo keli ah qaanuun ku cad dastuurka–fiiri qodobka 106aad. Caddaalada iyo garsoorayaasha ee heerka federaalka waxa lagu magacaabi karaa, xilka looga qaadi karaa ama tallaaboanshax marin looga qaadi karaa, soo jeedinta GudigaAdeega Garsoorka, taasoo si ka madaxbaanaan dawlada federaalka u shaqeysa –fiiri qodobka 109A iyo qodobka 111A. Si loo helo daah-furnaan dheeraad ah iyo garsoor sharci ku fadhiya, dawcooyinka maxkamadaha guud ahaan waa in ay u furnaadaan dadweynaha – fiiri qodobka 107aad. Si loo helo damaanad in shakhsi kasta awood u yeehso inuu si fudud ula xiriirka maxkamadaha, Dastuurka ku meelgaarka wuxuu ilaalinayaa xuquuqda aassaasiga ah ee helitaanka gargaarka garyaqaan (legal aid) fiiri qodobka 34aad.

Sideebuu ahaanayaa qaab-dhismeedkas maxkamada qaranku?

Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu dhigayaa saddex heer oo maxkamadeed oo kala duwan. Waxayna yihiin, maxkamada dastuuriga, maxkamada federaalka iyo maxkamada dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka. Maxkamada Dastuurigu waxay u hawsheeda gaarka iyo masuuliyadeeda tahay in ay go'aan kama damebeys ah ka gaarto arimaha khuseeya fasiraada qoraalka Dastuurka ku meelgaarka–fiiri qodobka 108aad. Iyadoo ay maxkamada dastuuriga ahi iyo maxkamada heerka dawlada federaalka ay maamuli doonto Gudiga Adeega Dastuurka, maxkamadaha dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka waxa maamulaya hayadaha lagu sameyay dastuurka dawlada ka midka ah federaalka– fiiri qodobka 109aad iyo qodobka 111A. Hase yeeshee Qawaaniinta Federaalku waxay hagaysaa xiriirka iyo wax wada-qabsiga ka

dhexeeya maxakamadaha heerka dawlada federaalka, iyo maxakamadaha heerka dawlada xubinta ka ah dawlada federaalka-fiiri qodobka 109aad (3).

Maxaa looga baahanyahay Maxkamad Dastuur ah?

Nidaamka federaalka, khilaafaadka dhexmara dawladaha kala duwan (dawlada federaalka iyo dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka) ee ku saabsan halka uu ku egyahay xuduudahooda Iyo heerka ay ku egtahay awoodooda sharciyeysan; ma aha wax aan caadi ahayn. Weliba waxay arrintani kaga badantahay dawladii hore ee nidaamka xukunka keli – mideysan (unitary) markuu u guuryo nidaamka federaalka arrintaasoo keeneysa in heerka awoodaha sharciyeysan loo baahan yahay in dib u-eegis cusub lagu sameeyo iyadoo lagu talo gelayo in arrimo dhawr ahi soo if-baxaan kuwaasoo ku saabsan Dastuurka ku meelgaarka iyo tarjumaada dastuurku, waxa Dastuurka ku meelgaarka siinayo maxkamada dastuuriga xaakinno khibrado gaar ah leh inay xaliliyaan dacwooyinkaas.

Garssooraha maxkamada dastuuriga waxa magacaabaya Maxdaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya isagoo tixraacaya soo jeedimaha Gudiga Adeega Garsoorkaiyo ansixinta Aqalka Dadka iyo ka qayb qaadashada Aqalka Sare ee baarlamanka federaalka-fiiri qodobka 71aad (i) 90aad (i) qodobka 109B.

Maxay noqoneysaa masuuliyadaha Maxakamada Dastuuriga?

Maxakamada dastuuriga waxay gaaraysaa go'aanka ugu dambeysa ee arrimaha ku saabsan dastuurka–fiiri qodobka 109aad (2)(b) inuu leeyahay awooda keli ah ee sharciyeysan ee arrimaha ku saabsan fasiraada dastuurka ee ma aha arrimaha ka soo baxa maxkamada oogista dawcooyinka ay anisixiyaan baarlamanka federaalka–fiiri qodobka 109aad (2) (c). Maxkamada Dastuurku waxay leedahay awood buuxda oo ay ku go'aamiso sharciyeynta qoraalka qaanuunka, sharciyeynta qawaaniinta ay ansixiyaan baarlamanka federaalka hadii guud ahaan laga soo hor-jeesto. Waxa kaloo ay leedahay mas'uuliyadda ay ku xaliliso khilaafaadka dhexmara dawlada federaalka iyo dawlada (ha) xubinta ka ah dawlada federaalka, khilaafaad dhexmara qaybaha kala duwan ee dawlada federaalka, ama khilaafaadka u dhexeeya dawladaha xubinta ka dawlada federaalka ama/iyo hadii madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya xil ka-qaadis lagu sameynayo ama haloo cuskado sharicya ama yaan loo cuskan–fiiri qodobka 109aad.

Guddiyadda Madaxabannaan

Waa maxay Guddiyadda Madaxabannaani?

Dastuurka ku meelgaarka wuxuu dhigayaa sharciyo ku saabsan gudiyadda madaxbanaan, kuwaasoo noqonaya xubnno shaqadoodu ka madaxbanaantahay dawlada ama kontroolka siyaasadeed si ay u maamulaan hawlaha gaar ah ee dawlada. Xubnaha Gudiga waxa lagu doortaa khibrad ee laguma doorto tixgelin siyaasadeed-fiiri qodobka 110aad. Gudiga kasta oo madaxbanaan, awoodooda, shaqooyinkooda iyo kartidooda was lagu toosiyaa sharci laga ansixiyey labada aqal ee baarlamanka federaalka – fiiri qodobka 110 aad (1).

Si loo helo daah-fur, la-xisaabtanka gudiyadda, waxa soo magacaaba wasiirada ayga khuseeya ka dib waxaa ansixiya Raiisal Wasaaraha iyadoo ku xirantahay ansixinta aqalka Baarlamanka Federaalka. Gudiyadda madaxbanaan qaarkood, waxa loo baahdaa ansixinta Aqalka Sare ee baarlamanka federaalka – fiiri qodobka 69aad (2) (a), qodobka 71aad (1), qodobka 112aad. Marka lagu jira habka magacaabida, waxa qasab ah in lala tashado Dawladaha Xubinnaha ka ah Dawlada Federaalka hadii awooda gudiga madaxbanaan ay saameyn weyn ku leedahay xubnaha ka tirsan dawlada federaalka danahooda dawliga ah–fiiri qodobka 111aad (2).

Waa kuwee Gudiyadda Madaxbanaan ee sameyntoodu Dastuurka ku meelgaarka ku talinaya?

Yadoo ay sameynta gudiyadda madaxbaanaani ayna ku xadidneyn kuwa ku xusan Dastuurka ku meelgaarka keli ah, qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu si cad u magacaabay dhawr guddi oo madaxbanaan kuwaasoo ay qasab tahay in lagu magacaabo sida ku qeexan Dastuurka ku meelgaarka. Waxay tahay in la sameeyo:

Gudiga Adeega Garsoorka oo masuul ka ah maamulka garsoorka a ay ku jirto magacaabista, xil ka-qaadista, talaabo ka qaadista khaladaadka ee xubnaha ka tirsan caddaalada – fiiri qodobka 109A iyo qodoka 111A. Waa in la magacaabaa gudian muddo 30 maalmood ka dib marka la sameeyo Golaha cusub ee Wasiirada – fiiri qodobka 135 (2)(a).

Gudiga Xuquuqda Aadnaha, oo masuul ka ah horumarinta iyo ilaalinta xuquuqdia aadmiga, iyo kor-meerista iyo kor ka ilaalista aragtidooda -fiiri qodobka 111B. Gudigan waxa lagu magacaabayaa muddo 45 maalmood ka dib mar la sameeyo Golaha cusub ee wasiirada-fiiri qodobka 135aad (2) (c).

Gudiga la dagaalanka mus-maasuqa oo masuul ka ah baaritaanka iyo daabacaada eedaha musq-maasuqa iyo dacwooyinka la xiriira qaybaha dawlada - fiiri qodobka 111C.

Gudiga Adeega Baarlamaanka oo masuul ka ah inay adeeg baarlamanka federaalka, iyo u fududeyn iyo habeyn xasfiisyo si u hubsadaan inay si wax ku ool ah baarlamanku u shaqeynayo – fiiri qodobka 111D. Gudigan waa in lagu magacaabaa muddo 15 maalmood ka dib marka la dhiso golaha cusub ee wasiira - fiiri qodobka 135aad (2)(d).

Gudiga Xuduudaha iyo Federaaliyadda oo masuul ka ah inay daraasad ku sameeyaan ayna ka talo bixiyaan tirada iyo xuduudaha mustaqbalka ee dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka–fiiri qodobka 111E. Gudigan waxa lagu magacaabayaa muddo 60 maalmod ka dib marka la sameeyo Golaha cusub ee Wasiirada–fiiri qodobka 135aad (2)(e).

Gudiga isku-xirka xubnaha xukuumadaha federaalka oo masuul ka ah inay hubsadaan isla shaqeynta iyo isla-xiriirka iyo iskaashiga iyo go'aano is-faham lagu xaliliyo khilaafaadka soo kala dhexgala dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka ama xubnaha dawladaha federaalka dhexdooda–fiiri qodobka 111F. Waxa gudigan la magacaabayaa hal sano ka dib marka la sameeyo Golaha cusub ee Wasiirada–fiiri qodobka 135aad (2)(f).

Gudiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka kuwaasoo mas'uul ka ah horumarinta hab-shaqo oo dhan sharciyeysana si loo maamulo, ilaaliyo iyo loo daabaco natiijooyinka doorashooyinka ee heeerka dawlda federaalka iyo diiwaan gelinta codbixiyayaasha, musharaxiinta iyo xisbiyadda siyaasada–fiiri qodobka 111G. Gudigan waxa lagu magacaabayaa muddo 60 maalmood ah ka dib marka la sameeyo golaha cusub ee wasiiradda- fiiri qodobka 135 (2)(e).

Gudiga Ammanka Qaranka oo masuul ka ah inay horumarinta hab ammaan –oo isku xiran kaasoo dhusha ka maamulaya qof rayid ah iyo in la ilaaliyo kharjka ay galaan xogaga nabadgelyada fiiri qodobka 111H. Waxa gudigan lagu magacaabi doonaa muddo 45 maalmood ah ka dib marka la sameeyo Golaha Cusub ee Wasiirada–fiiri qodobka 135 (2)(c).

Gudiga Runta iyo Is-cafiska oo masuul ka ah inay dhaliso bogsiin qaran, is-cafis, dib u heshiishiin iyo midnimo–fiiri qodobka 111. Waxa gudigan la magacaabayaa muddo 30 maalmood ka dib marka la sameeyo Golaha cusub ee Wasiiradda – fiiri qodobka 135 (2)(g).

Shaqaalaha Rayidka

Ayaa maamulaya shaqaalaha Rayidka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed?

Dawlada Federaalka iyo dawladaha Xubnaha ka ah dawlada federaalka waxay shaqaaleyn karaan shaqaalahooda u gaarka ah, waxayna si madaxbanaan u maamuli karan shaqaalahooda dawlada–fiiri qodobka 119aad (1). Si loo horumariyo midnimada qaranka waa in la hubsadaa helitaanka khubaradda iyo xirfadaha meelaha looga baahan yahay, dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka waxay iska kaashan karaan helitaanka shaqaalaha–fiiri qodobka 119 (3). Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu qeexayaa dhaqamada caadiga ah iyo in la ilaaliyo heerarka shaqaalaha rayidka ee heer kasta ee dawlada. Qoraalka Dastuurka ku meelgaarka wuxuu dalbayaa in dhamaan shaqalaha dawladu u shaqeeya dadka taasoo ku saleysan qiimaha dastuurka: naxariis, daah-fur la xiriirta maamulka jaranjarooyinka (hierarchies), habsami, wax ku ool, xirfad-shaqo , sinaan, iyo ku hababka ugu fiican ee la isticmaalo. Shaqaalaha Dawlada laguma ciqaabi karo xil gudashada shaqooyinkooda lama cayrin karo ama lama bedeli karo hadii ayna maangal ahayn, ama sharci–fiiri qodobka 115aad, 116aad.

Ayaa magacaabaya saraakiisha sare ee shaqaalaha rayidka?

Dastuurka ku meelgaarka wuxuu tilmaamayaa magacaabida shaqaalaha rayidka ee dawlada federaalka. Waxaana magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya markuu soo jeedin ka helo Golaha Wasiirada oo waafaqsantahay sharciga anisixiyey baarlamanka federaalka –fiiri qodobka 117.

Maaliyada Dawlada

Ayaa maamula Maaliyada Dawlada ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaalia?

Dastuurku wuxuu Soomaaliya Waajib kaga dhigayaa Inay noqoto Jamhuuriyad Federaal ah, in kastoo ay heerka la joogo Dawladaha Xubinta ka ah Dawlada Federaalka aan weli la sameyn. Markaasna uu Dastuurka ku meelgaarka ku dhaafayo arrinta sharciyeyteeda mabaad'iida ee maaliyada dawlada in laga wada xaajoodo, heshiisyana dhexmaaraan dawlada federaalka iyo dwalaha xubnaha ka tirsan dawlada federaalka iyadoo la dhawrayo abuuristooda–fiiri qodobka 122aad.

Hab-hawleedka maamulka maaliyada dawlada federaalka iyo khasnada qaranka waa in sharci lagu dejiyaa laga soo ansixiyey labada aqal ee federaalka baarlamaanka kasoo ku saleysan heerarka caalamiga ah iyo mabaad'iida lala higsanayo la-xisaabtanka, iyo daah-furka maamulista maaliyada dawlada–fiiri qodobka 124aad, qodobka 125aad. Sharci ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamanka federaaalka wuxuu dhigayaa abuurista baankiga dhexe ee federaalka kaasoo mas'uul ka ah dhisida iyo hirgelinta shuruudaha lacagta ay baananka oo dhan ee dalku ku dhaqmo–fiiri qodobka 123.

Nabada iyo Amaanka

Ayaa damaanad qaadaya nabada iyo ammaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya?

Dawlada Federaalka ayaa ka masuul ah damaanada nabada iyo ammaanka iyo madax-banaanida qaranka ee dawlada federaalka iyadoo isticmaaleysa ciidamada ammaanka, kuwaasoo lagu magacaabo ciidamada qalabka sida, sirdoonka, ciidanka boliska, ciidanka xabsiyada–fiiri qodobka 126aad. Hase yeeshe Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka, waxay xaq u leeyihiin inay sameystaan ciidamo bolis oo u gaar ah kuwaasoo ilaalinaya nafleyda iyo hantida dadka ee dawlad kasta oo federaal ah gooni ahaantooda ama inay iskaashi la galaan ciidanka Boliska federaalka–fiiri qodobka 126aad (5).

Dastuurka ku meelgaarka wuxuu dhigaaya mabaad'iida guud ay ciidamadda ammaanka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo dhani u hogaansanaanayaan kuwasoo ay ka mid tahay xaq-dhawrka, raacida qawaaniinta la isku maamulo, xukunka dimoqraadiga ah, iyo xuquuqda aassaasiga ah; iyo u hogaansanaan in la xajiyo ku dhaqanka dastuurka Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya, daah-fur, la-xisaabtan iyo siyaasad dhexdhexaad ah–fiiri qodobka 127aad (1).

Maxkamado gaar u ah ciidamadda qalabka sida waa in la sameey haase yeeshe meel ka dhaca xuquuqda aadamiga ee lagu soo oogo ciidamadda qalabka sida inay galeen waa in mar waliba la horgeeyaa maxkamad madani ah–fiiri qodobka 128aad. Cabashooyinka ku saabsan gaboodfalka xuquuqda aadmiga ee ay sameeyaan ciidamadda ammaanka waxa iyana lala tiigsanayaa xafiiska dacwo garsoorka dadweyne ombudsman), kaasoo baaritaan ku sameynaya dacwooyinka noocaas ah iyo haddii loo baahdo inay la horgeeyo maxkamada awood sharciyeysan oo fiican leh–fiiri qodobka 129aad. Sharciga ay ansixiyaan labada aqal ee Baarlamanka Federaalka wuxuu habeynayaa qaab-dhismeedka hawlaha iyo heerarka ciidamadda ammaanka ee Jamhuuriyada Federaalka ee Soomaaliya–fiiri qodobka 130aad.

Wax ka beddelka Dastuurka

Dastuurkan wax ma laga bedeli karaa?

Marka laga hadlayo wax ka bedelaad dastuurka, Dastuurka ku meelgaarka wuxuu u kala saaraya laba xili oo kala duwan kuwaasoo ah marka dastuur wax ka bedelkiisa la soojeedinkaro iyo marka la dhaqan gelinkaro. Mudada ka horeysa qaadashada Dastuurka ku meelgaarka inuu noqodo dastuurka rasmi ah ee Jamhuuriyada Federaalka ee Somaaliya kaasoo lagu aqbalay afti dadweyne iyo mudada ku xigta qaadashadiisa.

Sideebaa Dastuurka ku meelgaarka wax looga bedeli karaa?

Inta aanu dastuurku noqon mid rasmi ah kaasoo lagu aqbalay afti dadweyne, wax ka-bedel kasta oo lagu sameynayo Dastuurka ku meelgaarka waxa diyaarinaya gudiga dib u-eegista iyo hirgelinta ee Dastuurka ku meelgaarka. Waana inay ahaadaan gudi madaxbanaan oo ah khubaro sharci qoraal.

Kuwaaso ka kooban shan (5) xubnood. Gudiga madaxbanaan ee dib u-eegista iyo hirgelinta Dastuurka ku meelgaarka waa inay ku shaqeeyaan kor ka ilaalinta iyo hagitaanka gudiga dib u-eegista iyo hirgelinta iyo ilduufka (oversight) kuwaasoo ka kooban tiro xubno isku mid ah oo ka kala socda labada aqal ee dawlada federaalka iyo hal xubin midkiiba ka socota dawladaha xubnaha federaalka. Bedelaad kasta ay diyaariyaan labada gudi waa inay ansixiyaan saddex qayboodkiiba laba qaybood (2/3) kaasoo ah cod aqlabiyeed oo ah wadarta xubnaha labada aqal ee baarlamanka federaalka–fiiri qodobka 133aad, 134aad.

Qiimaha diyaaristani waxay suuragelineysaa in dastuurka lagu darro talooyin ka yimid dadweynaha iyo dadka siyaasada daneeya iyo in waliba la sii hagaajiyo inta aan loo gubin aftida dadweynaha.

Sideebaa dastuurka rasmiga ah wax looga bedeli karaa?

Ka dib ansixinta dastuurka rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, Dastuurka ku meelgaarka wuxuu ogolaanayaa in bedelo lagu sameeyo dastuurka marka lagu ansixiyo aqlabiyad Saddex qayboodkiiba laba qaybood (2/3) ee baarlamanka federaalka-fiiri qodobka 132aad. Wax ka-bedelka dastuurku waxaa hadaba diyaarinaya labaatan (20) xubnood oo ka kooban gudi mideysan ee labada aqal ee baarlamanka federaalka iyadoo toban xubnood uu soo magacaabeen afhayeenadda labada aqal –

fiiri qodobka 132aad (5). Wacyi-gelinta iyo dooda ku saabsan qoraalka wax ka bedelka ee dastuurka waa in la hormariyaa mar waliba–fiiri qodobka 132aad (6)g. Ka dib markay dadweynahu ku aqbalaan afti dastuurka rasmiga ah, waa in la bilaabaa hawl dib u eegis ramsi ah lagu sameyaa dastuurka kaasoo ay sameynayaa gudiga baarlamanka ee labada aqal ee baarlamanka federaalka kuwaasoo wada tashi la yeelanaya Dawladaha Xubinaha ka ah Dawlada Federaalka taasoo ku xujeysan ansixintooda – fiiri qodobka 137aad. Wax ka-Bedel kasta oo la soo jeediyo lana soo mariyo dastuurkan sharciga ah ee habka dib u-eegis, wuxuu isna sidaas si le'eg ku xujeysan yahay ansixida 2/3 ee aqlabiyada codadka wadarka labda aqal ee baarlamanka federaalka – fiiri qodobka 137 (4) 132aad.

Saameynta Dastuurka Ku Meelgaarka ah

Goormuu dastuurka ku meelgaarka ahi hirgelayaa?

Qoraalka dastuurka ku meelgaarka ah wuxuu hirgelayaa maalinta ay ansixiyaan Golaha Ansixinta Dastuurku maalinta ku xigta–fiiri qodobka 138aad.

Waa maxay saameynta uu yeelan karo dastuurka ku meelgaarka ahi?

Axdiga ku meelgaarka ahi wuxuu dhamaanayaa marka la kala diro Golaha Ansixinta Dastuurka–fiiri qodobka 143aad. Qawaaniinta jira oo dhami ee lagu shaqeynayey ka hor inta aan la ansixin dastuurka waa ay jiri doonaan, laakiin waa inay fasiraadooda iyo, ku dhaqankooda waa inay ahaadaan kuwo si waafqsan dastuurka ku meelgaarka-fiiri qodobka 139aad.

Isla sidoo kale waa in la dhaqan geliyaa heshiisyada caalamiga ah iyo heshiisyada ay Jamhuuiriyada Federaalka Soomaaliya qayb ka tahay kuwa jira–fiiri qodobka 140aad.

Ilaa iyo waqtiga la sameynayo dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaaalka, dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka dastuuradoodu iyo kan federaalka waa in la is-raaciyaa. Dastuurada Dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka ee hore u jiray inta ayna Golaha Ansixinta Dastuurka ansixin dastuurka ku meelgaarka ah; way haysan karaan awoodahooda ku salaeysan dastuurka xukuumadooda kaasoo ka madaxbanaan dastuurka dawlada federaalka. Laakiin waa in mar kastaba lala-tashadaa dawlada federaalka hab kastoo go'aan lagu gaarayo kaasoo ku saabsan nidaamka federaalka ama habeynta ammaanka-fiiri qodobka 142aad.